

Xeerka Maamulka, ee 21 Abiriil 1960, lamba. 22 diw.

Dhisidda Guddiga daraasaadka xeerar cusub, oo loo saarayo ilaalinta khayraadka xoolaad.

WASIIRKA BEERAHA IYO XOOLAHA MAAMULAHA

Markuu arkay sharciga 7 Maajo 1956, lamba. 1.

Markuu arkay XM, ee 18 Maajo 1956, lamba. 78;

Markuu arkay Amargooyada 12 Abiriil 1956, lamba. 26 diw.;

Markuu tixgeliyey baahiga loo qabo in la dhiso hayad ka hawlgasha daraasaad la xiriira ilaalinta, kordhinta (kobcinta) iyo qiimeynta khayraadka xoolaad iyo tan daba-taal oo ah diyaarintaxeerar la soo saaro oo ku saabsan maadada;

Markuu dhegeystay golaha Wasiirrada;

Asaga oo ku saleynayo soojeedinta Wasiirka Beeraha iyo C. Xoolaha;

WUXUU XEERINAYAA

Qod. 1

Waxaa la dhisayaa Guddiga U-dhexeeya Wasaarado oo muhimmadiisu tahay in uu darso xeerarka lagama maarmaanka u ah ilaalinta, kordhinta qiimeynta khayraadka xoolaad.

Qod. 2

Guddigaas la soo sheegay waxa uu ka kooban yahay:

- Wasiirka Beeraha iyo Xoolaha oo shir-guddoominaya;
- Madaxa Waaxda Cilmiga Xoolaha ama hawlwadeen kale;
- Madaxa Waaxda Xannaanada Xoolaha ama hawlwadeen kale;
- Wakiil Wasaaradda Arrimaha Gudaha;
- Wakiil Wasaaradda Caddaaladda;
- Wakiil Wasaaradda Maaliyadda;
- Wakiil Wasaaradda Wershadaha iyo Ganacsiga;
- Wakiil Ciidanka Boliiska;
- Wakiil Ciidanka Ilaalinta Canshuuraha;

Hawlwadeen ka socda Wasaaradda Beeraha iyo Xoolaha (Cilmiga Beeraha), oo uu soo magacaabay (cayimay) Wasiirka, ayaa qabanaya hawlaha Xoghaye, ee Guddiga.

Wasiirka Beeraha iyo Xoolaha waxa uu, in uu ka soo qaybgalo kulamada, ku casumi karaa Guddoomiyaha Rugta Ganacsiga, Wershadaha iyo Beeraha iyo khuburada aagga xoolaha iyo xannaanada xoolaha.

Qod. 3

Xeer Wasiie, ee dambe, marka la dhegeysto magacaabisyada la xiriira xubnaha kala duwan, ee Guddiga, waxaa lagu dhaqaaqayaa soo-saaridda xeerka magacaabista kuwa loogu talagalay in ay ka mid noqdaan Guddiga.

Qod. 4

Xubnaha Guddiga waxa ay leeyihiin lacagta ramsi ah, oo ay jideynayaan axkaamta lagu dhaqmo.

Qod. 5

Xeerkan waxa uu dhaqangelayaa maalinta lagu nashriyo Faafinta Rasmiga.
Muqdisho, 21 Abiriil 1960.

Maamulaha

Mario Di Stefano

Wasiirka Kowaad

Cabdullahi Ciise Maxamuud

Wasiirka Beeraha iyo Xannaanada Xoolaha

Salaad Cabdi Maxamuud

Markuu arkay, Diwaangeliyeyna- diw. lamba. 22, xaashi lamba. 14.

Muqdisho, 5^{ta} Maajo 1960.

Hanti-dhowraha: **Spadaro**